# Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta

**Ogeysiiskaan wuxuu sharaxaa sida loo isticmaali karo ama loo kashifi karo macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan iyo sida aad u heli kartid macluumaadkaan. fadlan si taxadir leh u fiiri.**

Ogaysiiskaan wuxuu dhaqan galayaa Janaayo 1, 2020.

## I. Cidda Aan Nahay

Ogeysiiskaan waxa uu sharaxayaa habka loo wajaho ammaanka xogta ee Nidaamka Caafimaadka Rugta Marshfield, Inc., Rugta Marshfield., Isbitaalada MCHS, Inc., Xaruunta Caafimaadka Qoyska ee Marshfield, Inc., Xarunta Caafimaadka Lakeview, Inc. ee Rice Lake, Isbitaalada Memorial, Inc. ee Neillsville, Wisconsin, iyo Isbitaalada Bulshada ee Beaver Dam, Inc. ("kuwa aan magacyadooda lasoo bandhigin"). Booqo barta www.marshfieldclinic.org/locations si aad u heshid macluumaadka goobta oo buuxa.

Dadka la ceymiyay iyo Security Health Plan ee Wisconsin, Inc. waa dhinacyo sharci ahaan kala baxsan. Hay'adaha ku jira iyo Qorshaha Caafimaadka Sugan (Security Health Plan) waxay sameyeen Qorshaha Daryeelkaa Caafimaadka Habeysan (Organized Health Care Arrangement) (OHCA"), taasoo u ogolaata ururada in ay si habeysan oo u roon bukaanka u maamulaan daryeelka.

Hey'adaha ku jira waxaa loogu yeeraa "anaga" ama "kuwena" hoos.

## II. Waajibaadka Naga Saaran Asturnaanta

Waxaan muddo dheer ballan qaadnay in aan badbaadino asturnaanta bukaanka. Sida qeyba la xariira xilkaan, waxaan raacsanahay sharciga federaalka iyo gobolka ee naga raba in aan adkeyno asturnaanta macluumaadkaada caafimaadka iyo in aan ku siino Ogeysiiskaan ku saabsan dhaqankena asturnaanta. Marka aan adeegsano ama kashifno macluumaadkaada caafimaadka, waxaa nalaga rabaa in aan raacno dhaqanka asturnaanta ee lagu sharaxay Ogeysiiskaan (ama ogeysiis kale oo shaqeeya waqtiga la isticmaalay ama la kashifay).

Waa in aan raacno sharciga federaalka ama sharciga gobolka, hadba midka in badan badbaadiya xuquuqdaada asturnaanta. Tusaale ahaan, haddii sharciga federaalka ogol yahay in la kashifo qaar ka mid ah macluumaadkaada caafimaadka, la'aanta ogolaashadaada, hase ahatee sharciga gobolka doono in aad qoraal ahaan ogolaatid kashifaadyada noocaas, waxaa qasab ah in aan raacno sharciga gobolka.

Waxaan reebaneynaa xaqa aan u leenahay in aan baddalno dhaqanka asturnaanta lagu sharaxay Ogeysiiskaan waqti kasta. Isbaddalada lagu sameeyo dhaqankena asturnaanta wuxuu quseeyaa dhamaan macluumaadka caafimaadka aan hayno. Haddii aan baddelno dhaqankeena amaanka, waxaan ogeysiiska cusub soo gelin doonaa boggeena internetka www.marshfieldclinic.org, iyo/ama waan kuu diyaarin doonaa adiga.

## III. Goorta aan Isticmaali karno iyo Kashifi Doono Macluumaadkaada Caafimaadka angaoo adeegsanayna Ruqsadaada Qoran

**Isticmaalka ama Kashifaadda Ruqsadaada.** Sabab kasta ha jirto marka laga reebo kuwa lagu sharaxay hoos, waxaa dhici karto in aan isticmaalno ama kashifno macluumaadkaada caafimaadka marka aad na siisid ogolaashadaada qorran kaliya in aan sidaas samayno. Tusaale ahaan, ma awoodno in aan macluumaadkaada caafimaadka u dirno shirkadda ceymiska naftaada ama in aan iibino macluumaadkaada caafimaadka ogolaanshahaaga la aantiis.

**Suuq Geynta.** Waa in aan helno ogolaashadaada oo qoran ka hor inta aan adeegsanin macluumaadkaada caafimaadka si aan kuugu soo dirno qoraalada suuq geynta. Waxaan ku siin karnaa qoraalada suuqgeynta, wiji ka wiji, ama waxaan ku siin karnaa haddiyad xayaysiin oo aad u qiimo yar, haddii aan sidaas doorano. Waxaa dhici karto in aan kaala soo xariirno badeeco ama adeegyada la xariira daweyntaada, si aan isuguduwno ama u maamulno daryeelkaada, ama kuu siino macluumaadka ku saabsan daweyn kala duwan, bixiyeyaasha ama noocyada daryeelka.

**Isticmaalka iyo Kashifaadyada Macluumaadka Aad u Qarsoon.** Sharciga gobolka waxa uu rabaa inuu macluumaadka qaar ee xasaasiga ah oo kusaabsan shaqsiyadaada ("Macluumaadka Aadka Qarsoodiga u ah"). Macluumaadkaan qarsoodiga ah waxaa kamid noqon kara qaybta macluumaadkaaga caafimaadka ee 1) ogeysiiska lasocoshada caafimaadka jirka; 2) daaweynta xanuunka maskaxda, kobaca naafada, cabista aalkahoolka, ama ku tiirsanaanta muqaadaraadka; 3) natiijada baarista HIV; ama 4) xadgudubka caruurta ama dayacaada. Marka laga reebo daweynta qaar ee lagu sharaxay Qeybta IV hoose, guud ahaan waxaan heli doonaa ogolaashadaada oo qoran si aan u isticmaalno ama usoo bandgigno Macluumaadka Qarsoodiga Sare (Highly Confidential Information). Waxa keliya ee ka reeban waxay tahay marka sharciga noo ogol yahay in aan kashifno Macluumaadkaada Qarsoodiga Sare (Higly Confidential Information) si loo fulliyo ujeedooyinka qaar, lana haysanin ogolaashadaada qoran. Tusaale ahaan, waxaa noola ogol yahay in aan macluumaadka ku saabsan daweynta cudurka madaxa ama itaal darrida koriimada u kashifno bixiyeyaasha kale ee ka shaqeeyo daryeelka caafimaadka ee ku lugta leh daweyntaada.

Sharciga federaalka waxa uu leeyahay shuruudo cad oo xadidan oo ku saabsan macluumaadka caafimaadka ee daaweynta dhibaatooyinka muqaadaraadka. Si aan usoo bandhigno macluumaadka caafimaadka ee ku saabsan muqaadaraadka aad isticmaasho ayadoo aan loo mareen habka sharciga oggolyahay, waxaa qasab ah inaan haysano oggolaanshahaaga. Qaabka kaliya ee la oggolyahay inaan kusoo bandhigno macluumaadkaas, anagoon haysan oggolaanshahaaga, waa xaalado xaddidan sida uu dhigaayo sharciga federaalka. Xaaladaha, marka aad qabtid xaalad degdeg ah oo caafimaad, waxaa laga yaabaa in aan shaaca ka qaadno macluumaadkaaga aqoonsiga bukaan-socodka ayadoo aan oggolaansho lagaa haysan.

## IV. Goorta Aan Isticmaali Karno ama Kashifno Macluumaadkaada Caafimaadka Anaga oo aan Helin Oggolaashadaada Qoran

**Daweynta.** Waxaa dhici karto in aan isticmaalno ama in aan kashifno macluumaadkaada caafimaadka si aan kuu siino daweeyn iyo adeegyo kale. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in takhtarka isticmaalo macluumaadka ku qoran diiwaankaada caafimaadka si uu u fiiriyo dhaawaca ku soo gaaray ama xanuunka kaddibna go'aan ka gaaro daweynta kuu banaan, sida daweynta ama qaliinka, ee sida ugu wanaagsan wax ka qabata baahidaada

caafimaadka. Intaas waxaa siidheer, waxaan u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan ugu qabano balamaha ama si aan kuugu soo dirno macluumaadka aad xiiseyn karto kuna saabsan daawooyinka kale ee aad isticmaali karto ama faa'iidooyinka kale ee ku saabsan caafimaadka iyo adeegyada. Waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno daryeel bixiyaasha caafimaadka kale ee ku lugta leh daweyntaada.

**Lacag bixinta.** Waxaa dhici karto in aan isticmaalno iyo in aan kashifno macluumaadkaada caafimaadka si aan u helno bixinta kharashka adeegyada aan adiga ku siino. Tusaale ahaan, si shirkadda ceymiska u bixiso kharashka daweyntaada, waa in aan u gudbino biil oo ku tilmaama adiga, waxaa laguugu sheegay in aad qabtid, iyo daweynta lagu siiyay. Sidaas awgeed, waxaan macluumaadka caafimaadka noocaas siin doonaa ceymiyaha si aan u helno bixinta kharashka biilasha caafimaadkaada. Waxaan kaloo macluumaadkaada caafimaadka u kashifi karnaa hay'ad kale oo bixisa daryeelka caafimaadka ama qorshaha caafimaadka xagga hawlaheeda lacag bixinta - tusaale ahaan, xagga qorshaha caafimaadka si loo ogaado xaq u yeelashadaada ama ceymiska.

**Hawlaha Daryeelkaa Caafimaadkan.** Waxaa dhici karto in aan u baahano macluumaadkaada caafimaadka si loo horumariyo tayada ama kharashka ku baxa daryeelka aan bixino. Hawlahaan tayada leh iyo kharashka ku baxa horumarinta waxaa ka mid noqon kara isticmaalka macluumaadka caafimaadka si loo qiimeeyo tayada adeegyadena daryeelka caafimaadka ama macluumaadkaada caafimaadka oo lala qeybsado Xariiriyeyashena Waayaha Bukaanka (Patient Experience Liasons) si loo hubiyo in adiga aad nala qaadatid booqasho wanaagsan. Waxaan kaloo macluumaadkaada caafimaadka u kashifi karnaa bixiye kale oo ka shaqeeya daryeelka caafimaadka ama qorshe caafimaad oo xariir kula leh ama kula lahaa adiga xagga hawlahooda daryeelka caafimaadka, sida bixiyaha daryeelka caafimaadka kale ama qorshaha caafimaadka si loo qiimeeyo shaqada ay qabtaan takhaatiirtaada, kalkaalinta iyo aqoonyaanada daryeelka caafimaadka kale.

**Diiwaanka Caafimaadka la Wadaago/Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka.** Waxaan ka qeybgalnaa qorshaha gobolka ee ka dhexeeyo urarada daryeelka caafimaadka, ee ku heshiiyay in ay isla shaqeyaan, in ay fududeyaan helitaanka macluumaadka caafimaadka ee laga yaabo in uu munaasab u yahay daryeelkaada. Tusaale ahaan, haddii degdeg laguu seexiyo isbitaal, aadna bixin karin macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xaaladaada caafimaadka, qorshahaan gobolka wuxuu noo ogolaan doonaa in aan macluumaadkaada caafimaadka, ee laga soo qaaday ka-qeybgaleyaal kale, siino kuwa u baahan in ay kugu daweyaan isbitaalka. Marka loo baahan yahay, macnaha in si diyaaran loo helo macluumaadkaada caafimaadka waa adiga lagu siiyay daryeel fiican. Waxaan macluumaadka caafimaadka ku saabsan bukaankena ku keydinaa diiwaanka caafimaadka elataroonigga lala qeybsado bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee ka qeybgala qorshahaan dagmada. Ka-qeybgaleyaasha waxay macluumaadkaada caafimaadka la qeybsan karaan ama ka heli karaan diiwaanka caafimaadka elataroonigga marka ujeedada tahay sida ku sharaxan Ogeysiiskaan. Waxaad la xariiri kartaa Xafiiska Asturnaanta (Privacy Office) adoo kala xariiraaya taleefan lambarka 866-268-9199 si aad u heshid liiska daryeel bixiyaasha caafimaadka ee si wadajir ah uga qeybgalay diiwaanka caafimaadka elataroonigga.

**Kashifaadyada loo gudbiyo Sharaakada Ganacsiga (Business Associates).** Si aan anaga ku fullino daaweynta, lacag bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka, waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno dadka ama ururada noo fulliya adeegyada, ama magaceena ku fulliya adeeg, una baahan isticmaalka ama kashifaadda macluumaadka caafimaadka aqoonsiga qofka. Dadka noocaas ama ururada noocaas waxaan la leenay iskaashiga ganacsiga. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno wakaalad u xilsaarta ururada daryeelka caafimaadka ama waakalad ka shaqeysa ururinta lacagaha la qabo in ay soo aruuriso bixinta kharashka biilasha caafimaadka.

**Kashifaadyada loo Ogol Yahay Qaraabada, Asxaabta Sokeeyaha ah iyo Bixiyeyaasha Daryeelka Kale.** Marka la soo qaado xaalado koobab, waxaa dhici karto in aan macluumaadka caafimaadka u kashifno dad sida xubnaha ka tirsan qoyskaada, qaraabada, ama asxaabta sokke ee kaalmo ka geysto daryeelkaada ama kugu kaalmeeyo bixinta kharashka biilasha caafimaadka. Macluumaadka la kashifay waxaa ka mid noqon kara macluumaadka aan aaminsanahay in uu si toos munaasab u yahay ku lug yeelashadooda daryeelkaada ama bixinta kharashka biilashaada caafimaadka, waxaana ka mid noqon kara goobta aad ku sugan tahay, xaaladaada guud ama dhimashada. Waxaan ku weydiin doonaa haddii aad waafaqsan tahay kashifaadda noocaas, haddii aadan awoodin in aad isku filan tahay ama haddii ay jirto arrin degdeg ah mooye. Haddii aadan awoodin in jirkaada shaqeeyo ama haddii ay jirto xaalad degdeg ah, waxaan kashifi doonaa macluumaadkaada caafimaadka haddii aan go'aan ku gaarno in ay kuu tahay maslaxadda ugu wanaagsan Waxaa dhici karto in aan sida habboon macluumaadka caafimaadka u kashifno xubnaha qoyska ee ku lugta lahaa daryeelka qofka dhintay ama bixinta kharashka daryeelka ka hor inta bukaanka uusan dhimanin, haddii marka sidaas la sameeyo aysan ka soo horjeedin waxa uu qofka dhintay horay noogu soo sheegay in uu rabo. Intaas kaddib, waxaan macluumaadkaada caafimaadka u kashifi karnaa ururada loo ogol yahay in ay wax ka qabtaan musiibooyinka si kuwa adiga kuu shaqeeyo u helaan macluumaaka ku saabsan goobta aad daggan tahay ama xaaladda caafimaadkaada.

**Kula soo xiriiraya.** Waxaan u adeegsan karnaa xogtaada caafimaadka si aan kuula soo xariirno oo aan kaagala hadalno balamaha, xog aruurinada, ama xariirada kale. Waxaan kugula soo xariiri karnaa boostada, taleefanka, iimeelka ama fariin qoraal markaad na siiso ciwaankaaga, nambarkaaga taleefanka, ciwaanka iimeelka ama lambarka taleefanka moobilka. Xogta la isku dhaafsado baraha oonleenka ah ayaa laga yaabaa inaysan amaan ahayn. Waxaad xaq u leedahay markay noqotaba inaad diido fariimaha qoraalka ah iyo/ama iimeelka adoo ka jawaabaaya fariinta ama wacaaya 866-268-9199.

**Diiwaanka Hay'adda Bukaanka/Goobta.** Haddii lagu seexiyo, waxaan diiwaankena ku qori doonaa magacaada, meesha lagu seexiyay, iyo xaaladda caafimaadka guud. Macluumaadka jadwalka waxaa la siin doonaa dadka macluumaadka ku weydiista magacaada. Haddii aadan rabin in aan liiska macluumaadkaan ku qorno diiwaankena kaddibna siino kuwa soo codsada, waa in aad ogeysiisid shaqaalaha in aad diidan tahay dhaqankaan.

**Qaaraanka Isgaarsiinta.** Waxaa dhici karto in aan kula soo xariirno si aan u codsano xisaabta aan laga goynin canshuurta si aan ugu taageerno hawlaheena. Haddii aan fullino qaaraan, waxaan shaqaalahena qaaraanka la wadaagi karnaa macluumaadka tirada dadka iyo macluumaad kale oo kugu saabsan adiga (sida magacaada, cinwaanka, taariikhda aad dhallatay, macluumaadka lagaala soo xariiro, taariikhda iyo waaxyada adeegga, dakhtarka daweynta, xaaladda ceymiska caafimaadka, iyo macluumaadka guud ahaan kasoo baxa), xattaa haddii aanan haysanin ogolaashadaada oo qoran. Haddii aadan rabin in lagaala soo xariiro wararka ku saabsan qaaraanka, fadlan nagala soo xariir boostada cinwaankeedu yahay 1000 N. Oak Avenue, Ku Socoto: Mu'asasada MCHS-IRI (MCHS Foundation-1R1), Marshfield, WI 54449; adoo lasoo xariiraya emailka giving@marshfieldclinic.org; ama telefoonka 715-387-9249 ama 800- 858-5220.

**Hawlaha Caafimaadka Dadweynaha.** Haddii loo baahdo ama sida sharciga ogol yahay, waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno hawlaha caafimaadka dadweynaha ee soosocda: (1) in macluumaadka caafimaadka la gaarsiiyo madaxda caafimaadka dadweynaha si looga hortago ama loo kantaroolo cudurka, dhaawaca, ama naafada; (2) in la soo sheego macluumaadka ku saabsan waxyaabaha la soo saaro ama adeegyada

ee hoos yimaada Maamulka Raashinka iyo Dawooyinka Mareykanka (U.S. Food and Drug Administration); (3) in digniin la siiyo qof laga yaabo in uu ku dhawaaday cudur leysku daaran karo ama laga yaabo in uu ku jiro halista in uu qaado ama faafiyo cudur ama xaalad; ama (4) in macluumaadka loo gudbiyo loo shaqeeyaha sida ay rabaan sharciyada la xariira cudurada shaqada iyo dhaawacyada ama ammaanka goobta shaqada.

**Dhibaneyaasha Ku Xadgudubka, Dayaca ama Dagaalka Guriga.** Haddii sida macquulka ah aan aaminsanahay in aad adiga tahay dhibane loo qeybtay xumaan, dayac ama dagaalka guriga iyo sharciga doono ama ogol yahay macluumaadka noocaas, waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno madaxda dawladda, sida adeegga bulshada ama wakaaladda adeegyada badbadiinta.

**Hawlaha Kormeerka Caafimaadka.** Sida loogu baahan yahay ama sida sharciga ogol yahay, waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno wakaaladda dawladda ee sharci ahaan mas'uulka ka ah in ay kor ka eegto siistemka daryeelka caafimaadka iyo mas'uulka ka ah hubinta u hoggaansamida sharciyada brograamyada caafimaadka dawladda sida Medicare ama Medicaid.

**Dacwadaha Caddaaladda iyo Maamulka.** Waxaan kashifi karnaa macluumaadkaada caafimaadka inta ay socoto dacwad la xariirta maxkamadda ama maamulka, jawaab laga bixiyo ammar ka soo baxay sharciga ama hawl kale oo la xariirta sharciga.

**Saraakiisha Hirgelinta Sharciga.** Waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno boliiska ama saraakiisha kale ee hirgeliya sharciga hadba sida loogu baahdo ama sida sharciga ogol yahay.

**Baareyaasha Dhimashada, Baareyaasha Caafimaadka iyo Agaasimeyaasha Duugta.** Waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno kuwa baara sababta dhimashada iyo baareyaasha caafimaadka ama agaasimaha duugta sida sharciga rabo ama ogol yahay.

**Siinta Xubinta ama Hilibka.** Waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno ururada fududeeya deeqidda ximinta, isha ama hilibka, keydinta ama ku talaalidda.

**Cilmi baarista.** Waxaa jira xaalado marka cilmi baareyaasha iyo shaqaalaha cilmi baarista isticmaali karaan ama kashifi karaan macluumaadkaada caafimaadka si loo sameeyo cilmi baaris xattaa haddii aan la haysanin ogolaashadaada. Cilmi baareyaasha waxay fullin karaan cilmi baaris oo sida fudud ku luga leh fiirinta macluumaadkaada caafimaadka iyo macluumaadka caafimaadka dadka kale ee qaba xaalado la mid ah ama xanuun. Xaaladaha noocaas, cilmi baareyaasha ma kaala soo xariiri karaan ogolaashadaada, balse waa in ay ruqsad ka soo qaataan guddiga [lagu magacaabo Guddiga Fiirinta Hay'adda (Institutional Review Board) ee ka jira si loo hubsado in maslaxadda iyo asturnaanta ka-qeybgaleyaasha cilmi baarista la badbaadiyo, sida sharciga rabo. Cilmi baareyaasha waxay kaloo fiirin karaan macluumaadkaada caafimaadka si ay u ogaadaan haddii ay jiraan bukaan ku filan oo qaba cudur gaar ah ama xaalad lagu fulliyo daraasad ama la ogaado haddii aad ahaan kartid qof ku fiican daraasadda loo baahan yahay in isdhexgal laguula sameeyo adiga. Xaaladaan, waxaa dhici karto in ay kula soo xariiraan si ay kuu weydiiyaan haddii aad dooneysid in aad ka qeybgashid daraasadda.

**Caafimaadka ama Ammaanka.** Waxaa dhici karto in aan isticmaalno ama in aan macluumaadkaada caafimaadka kashifno si looga hortago ama loo yareeyo cabsida culus oo ku soosocota caafimaadka ama ammaanka qof ama dadweynaha guud.

**Hawlaha Takhasuska Dawladda.** Waxaa dhici karto in aan isticmaalno iyo in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno hawlaha sekuritiga qaranka lana soo ogolaaday ama qeybaha dawladda ee fulliya hawlo gaar ah, sida ciidamada Mareykanka ama U.S. Department of State sida hoos timaado daruufaha qaar.

**Maxaabiista.** Haddii aad tahay maxbuus ku jira hay'adda dhaqan celinta ama hoos yimaada haynta sarkaal ka tirsan hirgelinta sharciga, waxaa dhici karta in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno hay'adda dhaqan celinta ama sarkaalka hirgelinta sharciaga si loo gaaro ujeedooyinka qaar. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in aan macluumaadkaada caafimaadka u kashifno hay'adda dhaqan celinta si ay kuu siiso daryeelka caafimaadka.

**Magta Shaqaalaha (Workers' Compensation).** Waxaa dhici karto in aan kashifno macluumaadkaada caafimaadka illaa inta loo baahan yahay si aan ugu hoggaansano sharciga magta shaqaalaha ama sharciyada la midka ah.

**Si Loogu Hoggaansamo Sharciga.** Waxaa dhici karto in aan isticmaalno iyo in aan kashifno macluumaadkaada caafimaadka marka sharci kale oo halkaan lagu soo qaadin nooga baahdo in aan sidaas samayno.

## V. Xuquuqdaada ku Saabsan Macluumaadka Caafimaadkaaga

**Xaqa ah in aad Codsatid in Xayiraad la saaro Istimaalka Qaar iyo Kashifaadyada laga sameeyo Macluumaadka Caafimaadka.** Waxaad codsan kartaa ka reeban sida macluumaadkaada caafimaadka loo adeegsado ama cidda macluumaadkaada caafimaadka loo kashifo: (1) xagga daweynta, bixinta kharashka iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, (2) lana siiyo qoyska ama asxaabta ku lugta leh daryeelkaada ama bixinta kharashka biilasha caafimaadka, ama (3) madaxda ku lugta leh dadaalka samafalka musiibadato. Inkastoo aan tixgelineyno dhamaan codsiyada la xariira waxyaabaha reeban, waajib nagu ma aha in aan waafaqno codsigaada. Si aad u codsatid in la xaddido sida aan u isticmaalno iyo sida aan u kashifno macluumaadkaada caafimaadka lana xariira ujeedooyinka kor lagu sharaxay, waa in aad foomka codsiga xaddidaadda ka qaadatid shaqaalahena Maamulka Macluumaadka Caafimaadka (Health Information Management) kaddibna iyaga u gudbisid foomka oo dhamaystiran. Waxaan kuu soo diri doonaa jawaab qoran**.**

**Xaqa in aad Codsatid in Xayiraad la saaro Macluumaadka Caafimaadkaada ee la siiyo Qorshaha Caafimaadka.** Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid, qoraal ahaan, in xaddidaad lagu sameeyo kashifaadda macluumaadkaada caafimaadka la rabo in la siiyo qorshaha caafimaadka haddii macluumaadka la xariiro oo kaliya shay la xariira daryeelka caafimaadka ama adeeg aad adiga, ama qof dhankaada ka socdo, uu si buuxdo jeebkiisa uga bixiyay.

**Xaqa in aad Heshid Wararka Asturan ee Macluumaadkaada Caafimaadka.** Waxaan soo dhaweyneynaa codsi kasta oo macquul ah in aan macluumaadkaada caafimaadka ku gudbino siyaabo iyo meelo kala duwan. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in aad rabtid in biilashaada laguugu soo diro P.O. Box baddalkii cinwaanka jidka. Waxaa dhici karto in aan kaa codsano in aad soo qortid codsigaada.

**Xaqa in la Joojiyo Ogolaashada in la Isticmaalo ama la Kashifo Macluumaadkaada Caafimaadka.** Waxaad joojin kartaa ruqsadda aad na siisay anaga marka laga reebo haddii aan horay isugu haleynay. Si aad u joojisid ogolaashada, waa in aad foomka joojinta ka qaadatid shaqaalahena Maamulka Macluumaadka Caafimaadka (Health Information Management) kaddibna iyaga u dirtid foomka oo dhamaystiran.

**Xaqa in aad Baartid iyo Koobi ka Samaysatid Macluumaadkaada Caafimaadka.** Waxaad codsan kartaa in lagu siiyo macluumaadka caafimaadka si aad u fiirisid ama si aad u codsatid koobiyada macluumaadka noocaas ah. Xaaladaha qaar, waxaa dhici karto in aan kuu diidno in aad heshid qeyb ka mid ah macluumaadkaada caafimaadka (tusaale ahaan, diiwaanada caafimaadka madaxa ama macluumaadka loo soo aruuriyay dacwadaha maxkamadda) sida sharciga ogol yahay. Si aad u fiirisid ama heshid koobiyada macluumaadkaada caafimaadka, waxaan u baahanahay in aad codsigaada ku soo gudbisid qoraal ahaan. Waa in aad foomka codsiga ka heshid shaqaalahena Maamulka Macluumaadka Caafimaadka (Health Information Management) kaddibna iyaga u gudbisid foomka oo dhamaystiran. Waxaan kugu soo dallici doonaa khidmad macquul ah xagga koobiyada macluumaadka caafimaadkaada, oo laga yaabo in ay kamid yahiin kharashka ku baxa koobiyada (sida kharashka ku baxa saadka iyo shaqada), shaabada boostada iyo diyaarinta sharaxaad ama soo koobidda macluumaadkaada caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay in aad codsatid in koobiga laguugu soo diro qaab ama hab elataroonig ah. Haddii qaabka iyo foomka aan si diyaar ah dib loo soo saari karin, waan kula shaqeyn doonaa adiga si aan u soo saarno foom ama qaab elataroonig ah. Haddii aad diidid qaababka elataroonigga la heli karo, waxaan ku siin doono koobi warqad.

Waa in aad xasuusatid in, haddii aad tahay waalid ama ilaaliyaha sharciga qof yar (cunug ka yar da'da 18 sanno jir), waxaa dhici karto in aadan heli karin qeybo ka mid ah macluumaadka caafimaadka cunugga yar (tusaale ahaan, diiwaanka la xariira daweynta isticmaalka mukhaadaraadka, natiijooyinka ka soo baxa baarista HIV, ama haddii qofka yar uu xuroobo).

**Xaq in aad Codsatid in la Saxo Macluumaadkaada Caafimaadka.** Waxaad na weydiin kartaa in aan saxno macluumaadkaada caafimaadka. Inkastoo aan tixgelin doono dhamaan codsiyada sixidda, waxaa dhici karto in aan diidno codsigaada bacdamaa ay jiraan asbaab xaq ah (tusaale ahaan, haddii macluumaadkaada caafimaadka yahay sax iyo dhamaystiran yahay ama aan anaga abuurin macluumaadka caafimaadka aad adiga aaminsan tahay in uusan sax ahayn. Si aad u codsatid in wax laga baddalo macluumaadkaada caafimaadka, waa in aad codsiga baddalaadda ka qaadatid shaqaalahena Maamulka Macluumaadka Caafimaadka (Health Information Management) kaddibna iyaga u gudbisid foomka oo buuxa. Foomka la buuxiyay waa in lagu soo daro sababta ka dambeyso codsiga.

**Xaqa aad u Leedahay in aad Heshid Diiwaanka Kashifaadyada Macluumaadka Caafimaadkaad.** Waxaad codsan kartaa liiska kashifaadda qaar ee ku saabsan macluumaadka caafimaadkaada aan anaga soo saarnay, muddada lexda sanno ee ka horeysay taariikhda codsigaada. Liiskaan waa in lagu soo darro taariikhda kashifaad kasta, cidda heshay macluumaadka caafimaadka la kashifay, sharaxaad gaaban oo ku saabsan macluumaadka caafimaadka la kashifay, iyo sababta loo kashifay. Liiskaan kama mid ah kashifaadyada laguu sameyay adiga, ama loo sameyay daweynta, lacag bixinta, hawlaha daryeelka caafimaadka, ama ujeedooyin kale. Si aad u codsatid liiska kashifaadyada noocaas, waa in aad foomka codsiga xisaabinta ka qaadatid shaqaalaheena Maamulka Macluumaadka Caafimaadka (Health Information Management) kaddibna iyaga u gudbisid foomka oo dhamaystiran. Haddii aad codsatid liiska kashifaadda noocaas in ka badan hal mar muddo toban iyo labo (12) bilood, waxaa dhici karto in aan kugu soo dallacno khidmad macquul ah**.**

**Xaqa in la helo Koobiga Ogeysiiskaan oo Warqad ah.** Waxaad codsan kartaa koobiga warqadda Ogeysiiska waqti kasta, xattaa haddii aad horay raali ugu noqotay in ogeysiiskaan laguugu siiyo elataroonig ahaan. Waxaad kale oo Ogeysiiskaan ka heli kartaa bogga Internetkeena *www.marshfieldclinic.org*.

**Xaqa aad u leedahay Xisaabta Biilasha kuu Gaarka ah.** Haddii aad xisaab la wadaagta qaangaar badan (macnaha, xisaabta ay ku qoran yahiin labo qaangaar ama ka badan halkaas ay qaangaarada helaan biilka dhamaan dadka ku qoran xisaabta), waxaad xaq u leedahay in aad codsatid xisaab kuu gaar ah adiga. Haddii aad dooratid in aad kusii jirtid xisaabta qaangaarka-badan, waxaad u baahan doontaa in aad saxiixdid foomka oggolaashada una ogolaatid in qaangaarada kale loo kashifo macluumaadkaada caafimaadka ee ku qoran biilkaada xisaabta. Haddii aad dooneysid xisaab kuu gaar ah, waxaad weydiisan kartaa shaqaalaheena Adeegga Macaamilka si loo abuuro xisaabtaan. In adiga laguu sameeyo xisaab cusub, oo ka gaar ah tan xaaskaada ama caruurtaada, macnaheeda waxay tahay in aad heli kartid biilal kala duwan oo u baahan doono in jeegag gaar ah loo qoro biil kasta. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan fursadahaan, wac telefoonka 800-782-8581 kaddibna weydii Adeegga Macaamilka (Customer Service).

**Xaqa aad u Leedahay in lagu soo Ogeysiiyo Jebinta.** Waxaad xaq u leedahay in lagu ogeysiiyo haddii la galay macluumaadkaada caafimaadka la badbaadiyo. Waxaan ku ogeysiin doonaa, muddo 60 maalin gudahooda kaddib marka la ogaado, haddii aan galnay macluumaadkaada caafimaadka ee aan ammaanka ahayn**.**

## VI. Ashtakooyinka

Haddii aad aaminsan tahay in la jebiyay xuquuqdaada asturnaanta, waxaad ashtako u gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha federaalka iyo anaga. Kaama aargoosan doono adiga haddii aad soo gudbisid ashtako. Si aad u soo gudbisid cabasho, fadlan la xariir xafiiskeena Privacy Office, Marshfield Clinic, 1000 N. Oak Ave., Marshfield, WI 54449. Dhamaan ashtakooyinka waa in loo gudbiyo qoraal ahaan.

## VII. Su'aalaha

Haddii aad qabtid wax su'aalo ku saabsan xuquuqdaada asturnaanta ama macluumaadka ku jiro Ogeysiiskaan, waxaad la xariiri kartaa Xafiiskeena Asturnaanta (Privacy Office), adoo kala xariiraya teleefoonka 866-268-9199.

Nidaamka Caafimaadka Rugta Marshfield waxa ay u hoggaansantaa sharciga codsiyada federaalka ayadoo cidna ku takooneyn jinsiyada, midabka, halka uu kasoo jeedo, nooca qofka, da'da, muuqaalka ama xaalada caafimaadka maskaxda, ama diinta.

ATENCIÓN: si habla español, tiene a su
disposición servicios gratuitos de asistencia
lingüística.
Llame al 715-221-7805.

LUS CEEV: Yog tias koj hais lus Hmoob, cov kev
pab txog lus, muaj kev pab dawb rau koj.
Hu rau 715-847-3599.